

Talooyinka Iskuulka ee Tallaalka Ka-dib

(Post-Vaccination Guidance for Schools)

Tallaallada COVID-19 ee ay oggolaatay FDA waxaa lagu arkay waxtar weyn oo ah ka-hortagidda infakshanka daran ee dhibaataada badan ee COVID-19, sida in aad loogu xanuunsado, isbitaal la seexdo, iyo in loo dhinto. Si looga jawaabo [caddeyn cusub](#) oo ah in dadkii laga tallaalay COVID-19 mar labaad la qaadsiiin karo xanuunka, Centers for Disease Control and Prevention (Xarumaha Xakameynta iyo Ka-hortagidda Cudurrada) waxay wax ka beddeshay talooyinkeeda ku saabsan dadkii sida buuxda isaga tallaalay COVID-19.

Dadka sida buuxda isaga tallaalay COVID-19, waa in ay ka soo wareegato ugu yaraan laba toddobaad ka dib markii ay dhammeysteen tallaalka, oo markaas haddii ay ku dhawaadaan qof laga helay COVID-19, lagama rabo in ay galaan karantiilid. Si kastaba, waa in ay:

- Isa soo baaraan 3 ilaa 5 maalmood ka dib markii ay ku dhawaadeen qof qaba COVID-19, xataa haddii aysan isku arkin wax calaamado ah.
- Gafuurxir u isticmaalaan goobaha dadweynaha ilaa 14 maalmood ka dib marka ay ku dhawaadeen xanuunka ama ilaa lagaa soo waayo COVID-19.
- Iska ogaadaan wixii calaamado ah oo ku soo baxa ilaa iyo 14 maalmood ka dib markii ay qof ku dhawaadeen.
- Guriga isku gooni yeelaan haddii ay isku arkaan calaamadaha ama laga helo COVID-19.

Macallimiinta, shaqaalaha, iyo ardeyda sida buuxda loo soo tallaalay waa in ay naftooda **iska war hayaan [calaamadaha COVID-19](#) ilaa 14 maalmood ka dib markay ku dhawaadeen xanuunka.**

- Haddii ay mar un isku arkaan calaamado, waa in ay dadka ka dhex baxaan, waa in ay dhakhtar u tagaan si loo soo qiimeeyo, iyo in ay isa soo baaraan.
- Si aad uga hortagto in xanuunka la is qaadsiiyo, macallimiinta iyo shaqaalaha tallaalka qaatay waa in ay **raacaan [talooyinka hadda socda ee ay ku difaaci karaan naftooda iyo dadka kale ee iskuulka jooga](#)** – sida isticmaalidda gafuurxirka, in dadka laga fogaado ugu yaraan lix fiit, inaan la aadin goobaha dadka badan, inaan la aadin meelaha aan hawo marawaxad ah oo kale ah lahayn, in la daboolo qufaca iyo hindhisada, iyo in gacmaha la dhaqdo.

Macallimiinta, shaqaalaha, iyo ardeyda aan sida buuxda loo soo tallaalin waa inay **la socdaan [talooyinka karantiilidda oo waa in la soo baaro](#)** ka dib marka ay ku dhawaadaan qof qaba ama looga shakisan yahay COVID-19.

Iskuulku waa in uu sii wado in la sameeyo waxyaabaha badan oo la iska rabo oo xanuunka lagu yareynayo ilaa ay dhacdo in aan xanuunka la qaadsiiin karin dadka qaatay tallaalka, iyo marka ay iskuullada iyo dadweynaha caadiga ah badankoodu qaataan tallaalka. **Sababahaas awgood, iskuulka oo dhan waa in ay raacaan talooyinka lagu yareynayo xanuunka ilaa iyo amar dambe, sida in iskuulka lagu isticmaalo gafuurxir iyo in la kala fogaado.**

Cilmi-baaris dheeraad ah ayaa socota si loo go'aamiyo sida ay tallaalladu u difaacayaan dadka uu liito difaaca jirkooda, inta uu la shaqeyn doono, iyo waxtarka tallaalka ee ah difaacidda cusub ee **SARS-CoV-2-diisa nooc**. Mar kasta oo xog la helo waxaa la cusbooneysiin doonaa talooyinka loo hayo dadweynaha tallaalka qaatay iyo haddii la soo oggolaado tallaalka kale oo ah COVID-19, iyo in oggolaanshaha hadda laga heli karo tallaallada lagu sii ballaariyey dhallinyarada da'da yar.

